

# Ku soo dhowow waxbarasho-horaadka

– macluumaa mas'uuliyiinta loogu talagalay ee ku saabsan waxbarasho-horaadka

## Ilmahaagu waxaa uu deyrta dambe bilaabayaan waxbarasho- horaadka!

Waxbarasho-horaadka waxaa laga qaybqataa sannad kahor billaabashada waajibka waxbarashada. Waxbarashada waxaa wax looga bartaa iyadoo loo sii marayo ciyaar iyo wadajir wax u baaritaan, waxaa lagu bartaa aqoonta saaxiibtinimada ee fiican waxaana sidoo kale la xoojiyaa isku kalsoonaanta cunugga.

Waxbarasho-horaadka ku baxda afka finnishka iyo iswiidhishka waxaa magaalada Helsinki looga qabanqaabiyya xannaano-maalmeedyada degmada iyo kuwa gaarka loo leeyahay. Waxbarasho-horaadka waxaa lagu qabanqaabin karaa qolalka xannaano-maalmeedka ama dugsiga. Cunug kasta oo reer Helsinki ah wuxuu ugu horreyn booska waxbarasho-horaadka ka helayaa nawaaxiga ardaya laga qaadanayo ee waxbarasho-horaadka.

Nawaaxiga ardaya laga qaadanayo ee waxbarasho-horaadku waxay ku salaysantahay cinwaanka guriga cunugga. Waxaa laga yaabaa in hal nawaaxiga qaadashada ardaya ee waxbarasho-horaadka ay ku yaalaan hal ama dhovr goobood oo qabanqaabiya waxbarasho-horaadka. Waxaa sidoo kale isla nawaaxiga ku aali kara dhovr dugsi. Waxaa lagu dadaalayaa in goobta waxbarasho-horaadka cunuggu ay noqoto goob waxbarasho oo uu ka sii wadan warko dugsiga xaafadda ee waafaqsan cinwaankiisa. Inta uu ku jiro sannadka waxbarasho-horaadka wuxuu cunuggaa baranayaa asxaabta uu dugsiga la dhigan doono. Baahida taageerada cunugga ama daryeelka xilliyeed darteed ayeey goobta waxbarasho-horaadku noqon kartaa mid ku taal meel aan waafaqsanayn cinwaanka guriga ee ee nawaaxiga qaadashada ardaya waxbarasho-horaadka. Goobaha waxbarasho-horaadka ee waafaqsan cinwaanka gurigaada waxaad ka hubin kartaa cinwaanka **palvelukartta.hel.fi**. Nawaaxiyada arday qaadashada ee waxbarasho-horaadka waxaa laga helaa **hel.fi/esiopetus**.

Waxaa sidoo kale booska waxbarasho-horaadka laga codsan karaa nawaaxi arday qaadasho oo kale, haddii meeshaas laga helo boosas waxbarasho-horaad oo bannaan. Nawaaxiga arday qaadashada ee waxbarasho-horaadka uu qabanqaabinayo xannaano-maalmeed gaar

loo leeyahay waa magaalada oo dhan, markaasna waxaa waxbarasho-horaadka gaarka ah toos looga codsan karaa xannaano-maalmeedka la doonayo.

Waxbarasho-horaadku waa lacag la'aan waxaana inta badan la bixiyaa afar saacadood maalintii inta lagu jiro wakhtiyada ay dugsiyadu shaqeeyaan. Waxbarasho-horaadku waxay Agoosto 2022 billaabanyasa **11.8.2022**.

## Codsashada booska waxbarasho-horaadka

Waalidka cunugga aan ku jirin barbaarin-horaadka degmada waa in uu cunugga u codsadaa waxbarasho-horaadka. Waxbarasho-horaadka waxaa wakhtiga u dhixeeya **1.-15.3.2022** laga codsanayaa arrimo fullinta elgtroonigga ah ee Helsinki (asiointi.hel.fi). Haddii aysan codsashada elektroonigga ah suurtagal aheyn, foom warqad ah ayaa booska lagu codsan karaa, foomkaas oo boostada loogu soo dirayo hagitaanka adeegga barbaarin-horaadka oo cinwaankiisu yahay Hagitaanka adeegga barbaarin-horaakda, PL 51300, 00099 magaalada Helsinki. Codsiga waxbarasho-horaadka ee xannaano-maalmeedka gaarka loo leeyahay waxaa si toos ah loogu geynayaa xannaano-maalmeedka gaarka loo leeyahay ee la doonayo.

Barbaarin-horaadka waxaa si waafaqsan baahida qoyska loogu qabanqaabinayaa isla goobta waxbarasho-horaadka iyadoo dhammaystiraysa waxbarasho-horaadka. Macluumaa dheeraad ah wuxuu ku jiraa cinwaanka **hel.fi/esiopetus**.

## Ku socota ardaya dugsi- horaadka

Deyrta soo socota waxaa kuu billaabanya dugsi-horaad. Dugsi-horaadka waxaad ciyaar ahaan, jimicsi, baaritaan iyo farshaxan ahaan ku baranaysaa wax cusub. Waaad ku baranaysaa saaxiibo cusub waxaad ka uruursanaysaa buurso buuxda oo waayo-aragnimo ah. Waaadna sidoo kale inta sannadka lagu jiro soo qooraansan doontaa waxa ka dhacaya dugsiga.

Macluumaa dheeraad ah oo ku saabsan qabanqaabinta waxbarasho-horaadka waxaad ka heleysaan bogagga shabakadda Helsinki ee **hel.fi/esiopetus**

Ku soo dhowow dugsi-horaadka!

Helsinki

hel.fi/esiopetus  
#HelsinkiOppii